Ha la joojiyo gudniinka

AAN KA BADBAADINO GABDHAHEENA GUDNIINKA

Somali

Muxuu yahay gudniinku?

Gudniinku waa goyn la gooyo qayb ama gabi ahaan xubnaha taranka haweenka oo aan sabab caafimad ku salaysnayn. Una geysan kara qof-ka caafimaad-kiisa dhibaato weyn.

Sida ay hay'ada caalimaga ee caafimaadka (OMS,WHO) ay u kala qeexday, gudniinku waxaa uu u kala baxaa qaybaha kala ah:

Qaybta 1aad: Goyn la gooyo kintirka foodiisa hore ama dhamaantiis, (Suna).

Qaybta 2aad: Goyn la gooyo kintirka dhamaantiis iyo faruuryaha yar yar qayb ka midah, ama dhamaantoodba la jaro.

Qaybta 3aad: goyn la gooyo kintirka, faruuryaha yaryar, iyo faruuryaha waaweyn oo la gooyo layskuna tolo (Fircooni).

Qaybta 4aad: noocyada kale ee aan la qeexin waxaa ka mid ah, kintirka oo la dalooliyo, faruuryaha oo la xuubiyo ama cambarka oo dhir iyo caleemo isku xidha lagu shido.

Waxyeelooyinka ugu waaweyn ee uu ku keeni karo qofka shaqsi ahaan ama maskaxiyan gudniinku.

Dhibaatooyinka ka iman kara isla markiiba waxaa ka mid ah:

- Xanuun aad u daran, maqaarka oo dhaawacma, miyir beel, iyo qofka oo geeri ku sigta.
- Dhiig bax, infekshen (Cagaarshow, teetano, aydhis iyo dhiiga oo sumooba). Waxayaalahaas oo keeni kara geeri.
- Seeda oo booda.
- Kaadida oo gubta kuna ceshoonta.

Dhibaatooyinka ka iman kara mustaqbalka:

- Caadada iyo kaadida oo ku xanuujiya.
- Infekshen gala tuubada ilma mareenka, kaadi mareenka, oo isu badali kara jeermis gala dhiiga, keenina kara dhalmo la'aan iyo dhimashaba.
- Dhibaato xoog leh oo ka iman karta kaadi haysta.
- Foosha oo dheeraata oo xanuun aad ahna leh, kuna keeni karta ilmaha iyo hooyada dhimasho (umul raac).
- Dareenka xubnaha taranka haweenka oo is dhima amaba ka guura.
- Xanuun daran oo lala kulmo xiliga galmada ama isu taga.
- Dhibaatooyinka adag ee uu ku keeni karo dhinaca caafimaadka maskaxda waxaa ka mida: Walaac, welwel, cabsi joogto ah, hurdo la'aan, buufis cuqdad nafsi, isku kalsooni la'aan iyo ku fikir is dilid.

Dhibaatooyinka gudniinka ka yimaada ma la xalin karaa?

Waxaa jira qaliin dib loogu dhiso xubintii la gooyay, wuxuuna saamaxaa in dareenka qaarkiis u soo noqdo.

Qaliinkaas oo aan loo badnayn waxaa mar walba weheliya daryeel loogu tala galay caafimaadka nafsada.

Faahfaahin dheeri ah waxaad ka heli kartaan dhaqaatiirta dumarka (Jinikoloog) iyo umulisooyinka.

Wadamadee ayaa laga gudaa gabdhaha?

Waxaa gabdhaha laga gudaa sideed iyo labaatan wadan oo Afrika ku yaala iyo wadamada carabta qaarkood sida Yaman, Cumaan. Ama wadamadda Maleeshiya iyo Indoniisiya.

Marka la qiyaaso dumarka gudan 5%, waxay ku nool yihiin Yurub, waqooyiga Ameerika iyo ustraaliya. Ayaga oo xisaabtoodu gaarayso 6,5 malyan xisaabtaas waxaa ku jira 7000 oo ku nool wadanka Iswiisarland.

15 kii ilbidhiqsiba (second) Gabar ayaa aduunka lagu gudaa! Wargaysyada ka soo baxaya haya'da caalamiga ee caafimaadka "OMS, WHO" waxay qeexayaan in dumarka iyo gabdhaha la guday ee ku nool aduunka ay tiradoodu tahay 100 ilaa 140 malyan, waxaa kale oo hay'adu xaqiijisay in labo milyan ay khatar ugu sugan yihiin in la gudo.



(A. Andro, M. Lesclingand,
Population & Sociétés, n° 438, Ined, octobre 2007)

Wadamadan qabiilo ka mid ah ayaan is gudin.

Maxaa loola dagaalamayaa Gudniinka?

- Waa qalad in la yiraahdo diintaa ayaa na faraysa Gudniinka!

  Diin faraysa in dumarka la gudo ma jirto. Gudniinku waa dhaqan ka horeeyay diinta islaamka iyo midda masiixigaba, waxaana looga dhaqmi jiray wadanka Masar xiligii Fircooniyiinta.

- Waxaa qalad ah in la yiraahdo Gudniinku taranka ayuu badiyaa!

  Gudniinku taranka ma badiyo, wuxuu keeni karaa dhibaato caafimaad daro, sida dhimashada ilmaha iyo hooyada (Umul raac).

- Waa been in la yiraahdo gudniinku wuxuu celiyaa hamiga gabdhaha iyo xaasaska!
  Gudniinku qof shaqsiyadiisa ma badalo. Xiriirka labada qof wuxuu ku dhismi karaa is aamin iyo isxushmayn.

- Waa qalad ah in la yiraahdo qofka gudani waa nadiif!
  Gudniinku wuxuu sabab u yahay nadaafad daro ka dhalata xubnaha taranka oo keeni kara infekshen.

- Waa qalad in la yiraahdo hidaha iyo dhaqanka ayaa sharciga ka sareeya!
  Waa waajib in markasta sharciga la tix galiyo!

  Waxaa dhiiri galin leh dhaqamada wanaagsan ee hidaha iyo dhaqanka loo leeyahay oo kaamili kara caafimaadka sida naas nuujinta iyo dhabar ku xambaarka caruurta.

Sharciyada wadanka Iswiisku maxay dhigayaan?

Wadanka iswiserland Guniinku waa ka mamnuuc.
Gudniinku wuxuu u dhigmaa adigoo gaystay dhaawac halis ah (122CP), waxa ay la mid tahay adiga oo halis galiyay qof caafimaadkiisa iyo noloshiisa (127CP).

Gudniinku waxa uu la mid yahay dhibaatooyinka waxyeelada leh ee loo geysto caruurta aan qaan gaarka ahayn, sharcigu wuxuu farayaa dhaqaatiirta la kulanta caruurta la soo gudo, inay la socodsiiyaan waaxda daryeelka caruurta ee dawlada (36CP).

Xataa haddii gabadha codsigeeda lagu gudo, sharciga benaalka ayaa qabanaya qofkii guday.

Falaalka gudniinka qofkii lagu qabto sharciga benaalka swissku waxa u dhigaya in lagu xukumi karo lix bilood ilaa iyo toban sano oo xarig ah.

Waaridiinta guda gabadhooda, dadka ka qayb qaata ama diyaariya falalka gudniinka sida dhaqaatiirta, dumarka wax guda, waa wada dambiileyaal, waxaana qabanaya sharciga wadanka Iswiiska.

Haddii gudniinka laga diyaariyay wadankan oo loo kaxeeyo gabadh wadankale, (wadanka hooyo) waxaa qabanaya sharciga Iswiiska.

Baarlamaanka maamul goboleedka dowladda Geneva ayaa mooshin ku qeexday bishii juun 2006, inuu gudniinku ka mid yahay xadgudubyada xaquuqda aadanaha, waxa uuna soo jeediyay in la wacyi galiyo dadka u dhashay wadamada gudniinku uu ka jiro iyo waliba dhaqaatiirta gobolka.

Afrika

Wadamada gudniinku uu ka mamnuuc yahay Afrika waxaa ka mid ah: Benin, Burkina Faso, Afrikada dhexe, Ivory Cost, Djabuuti, Masar, Ghana, Guinea Conakry, Kenya, Niger, Senegal, Tanzania, Tchad iyo Togo

Waxaa kale oo ka mid ah wadamada Afrika ee sida sharciyeeysan u mamnuucay gudniinka: Itoobiya, Iritareeya iyo suudaan.

Xeerarka caalamiga ah waxay dhigayaan:
Ku dhaqanka Gudniinku waxa uu xadgudub ku yahay xuquuqda aas aasiga ee aadanaha.

- Xuquuqda uu qofku u leeyahay jirkiisa iyo xuquuqda uu leeyahay xiliyada isu taga.
- Qofku waxa uu xaq u leeyahay inuu helo caafimaad fiican.
- Waxaa mamnuuc ah in lagu dhaqmo wax dhibaato halis ah u keeni kara qofka beni aadanka ah.

Ayada oo la tix galinayo xaquuqdaas kala duwan wuxuu caalanku isku raacay:

- In caalamka laga tix galiyo xuquuqda aadanaha (Paris 1948).
- In caalamka laga cirib tiro ku dhaqanka cunsirinimada, kala soocida, iyo xaqiraada haweenka (New York 1979).
- In la tix galiyo xuquuqda caruurta (New York 1989).
- In la tix galiyo xeerka Afrika u yaala ee xaq dhawrka umadaha iyo xuquuqda aadanaha. (Nairobi, 1981).
- In la tix galiyo xeerka Afrika u yaala ee xaq dhawrka caruurta (Adis-Ababa1990).
- Tix galinta sharciyada xeerarka Afrika u yaala ee xaquuqda aadanaha umadaha iyo gaar ahaan dumarka (Maputo 2003).
- Tix galinta xeerarka Yurub u yaala ee xuquuqda aadanaha (Rome 1950).

Ciwaanada Muhiim-ka ah

Service médical

Qaybta caafimaad-ka dumarka
Maternité (femmes enceintes) et gynécologie (HUG)
Boulevard de la Cluse 30-1205 Genève
Tél. 022 382 68 16

Isbitaal-ka caruurta
Hôpital des enfants (HUG)
Rue Willy Donzé 6-1205 Genève
Tél. 022 372 47 00

Waaxda caafimaad-ka dad-ka geedi socod-ka ah
Centre de santé migrants (HUG)
Rue de Lyon 89-1203 Genève
Tél. 022 382 33 33

Waaxda xubnaha taranka, galmada iyo caafimaad-ka maskax-da
Consultation de gynécologie psychosomatique et sexologie des HUG
Rue des Pitons 15-1205 Genève
Tél. 022 372 85 81

Qaybta dhaqaatiirta ee ka hor taga dhibaa-tooyin-ka
Consultation interdisciplinaire de Médecine et de prévention de la violence (CIMPV-HUG)
Rue Micheli-du-Crest 24-1205 Genève
Tél. 022 372 96 41

Waaxda wacyi galinata iyo la talinta qoysas-ka
Planning familial (CIFERN-HUG)
Boulevard de la Cluse 47-1205 Genève
Tél. 022 372 55 00

Waaxda umulisooyin-ka
Arcade Sages-femmes
Boulevard Carl-Vogt 85 - 1205 Genève
Tél. 022 329 05 55

Xafiiska daryeel-ka caruurta
Service de protection des mineurs (SPMi - DIP)
Rue Glacis-de-Rive 11 - 1207 Genève
Tél. 022 546 10 00

Waaxda daryeel-ka nafsada ee dad-ka geedi socod-ka ah
Appartenances
Boulevard Saint-Georges 72 - 1205 Genève
Tél. 022 781 02 05

Pluriels
Rue des Voisins 15 - 1205 Genève
Tél. 022 328 68 20

Waaxda gargaar-ka ummada dhibaateysan
Centre LAVI (pour toutes personnes victimes de violence)
Boulevard Saint-Georges 72 - 1205 Genève
Tél. 022 320 01 02

Kalkaalka dumarka geedi socod-ka ah
Camarada (accueil et formation élémentaires pour femmes migrantes)
Chemin de Villars 19 - 1203 Genève
Tél. 022 344 03 39

Waxa kale oo aad wax ka weydiin kartaan qof idin ku wadan ah oo aad ku kalsoon.

Edition :
Département des institutions
Office des droits humains
14, rue de l'Hôtel-de-Ville
Case postale 3962
1211 Genève 3

camarada
centre d'accueil et de formation pour femmes migrantes

Pour commander :
Service pour la promotion de l'égalité
entre homme et femme
Rue de la Tannerie 2, 1227 Carouge
Tél : 022 388 74 50 • Fax 022 388 74 60
egalite@etat.ge.ch • www.ge.ch/egalite

Tous droits de reproduction réservés..
Genève, mai 2008.

POST TENEBRAS LUX

REPUBLIQUE ET CANTON DE GENÈVE

camarada

centre social protestant pour femmes migrantes

Illustration de couverture: Khadra / 08